



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 23/2010

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay oo Maalinta Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka ugu baaqay Dowladda Ku Meelgaarka inay arrintan meel sare ka geliso ajendaheeda

Nayroobi, 10 Diisembar 2010 – Isagoo ka hadlaaya Maalinta Caalamiga ee Xuquuqul Insaanka oo ku beegan 10ka bisha Diisembar 1948 oo ah maalintii la isla go'aansaday Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka, ayaa Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Danjire Augustine P. Mahiga, maanta ugu baaqay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah ee Soomaaliya inay aad u weyneyso arrimaha xuquuqul insaanka qorshahawleedkeedana ay meel wayn uga qorto maddaama hadda la gelayo dhamaadkii xilliga ku meelgaarka oo ku beegan bisha Agoosto 2010.

Wuxuu ugu baaqay dowladda cusub in ay xaqiijiso in mabaadi'dan taariikhiga ah ay ku darsato qorsha hawleedkeeda ku aaddan dhamaadka xilliga ku meelgaarka ah.

“Nolosha dad badan oo Soomaliyeed ayaa gabi ahaanba is bedeshay ama la dayacay taasoo ugu wacan qalalaasaha ka socda dalka iyo iyaadoo gabi ahaanba layska indha tiray dhowritaanka mabadi'da Baaqa Xuquuqul Insaanka. Haddii aan la tixgelin xuquuqul insaanka, nabad iyo xasilooni waarta lama helayo waxaana sii socon doona waxyeleynta dad hor leh ee Soomaaliyeed.

“Maadaama Dowladda ku Meelgaarka ah ay xoogga saareyso meelmarinta hawlaha muhimadda u leh, oo ay uguna horeeyso qoritaanka dastuurka cusub kasoo noqon doona asaaskii soo celinta nabadda iyo xasiloonida, hadda waxaa muhiim ila ah in lagu muujiyo dastuurka arrimaha xuquuqul insaanka oo laf dhabarka u ah arrimaha siyaasadda, sharciga, garsoorka iyo arrimaha bulshada.

“Sidaan ku sheegay hadalkii aan ka jeediyey shirkii lagu qabtay Geneva bishii Sebtember loogana hadlayey arrimaha Soomaaliya, kuma filna tababarka booliska, ciidanka militariga iyo hay'adaha garsoorka ee la barayo xuquuqul insaanka, ee waa in arrimaha

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org



Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

xuquuqal insaanka ay aad uga muuqdaan madaxda hay'adaha dowladda dhexdooda, siyaasadda la dejinayo iyo wax qabadkoodaba.

“Qaraarkii uu qaatay Golaha Xuquuqal Insaanka 1dii October 2010 ayaa ugu baaqaya madaxda Soomaliyeed, iyadoo la kaashanaya UNPOS, hay'adaha Qaramada Midoobay iyo baraaamijyada kale ee ku lug leh hawlahaan xuquuqal insaanka, inay dejiyaan qorsha hawleed la joogtayn karo oo leh hab lagu qiimeeyo si Soomaaliya loogu hagi waddadii lagu gaari lahaa nabad waarta isla markaana loogu abuuri lahaa jawi ku haboon oo lagu hormariyo laguna badbaadiyo xuquuqal insaanka.

“Waxaan ogahay in Soomaaliya ay leedahay gesiyaal difaaca xuquuqal insaanka. Maanta, waxaan jeclahay inaan xuso gesinimada dadka Soomaliyeed oo hor istaagaya kuwa wax u dhimaya dadka aadka u jilicsan ama xukun ciqaab ah marinaya dadkaasi iyagoon la marinin nidaam garsoor. Gesiyaasha aan soo shegaay qaarkood waxay la kulmeen handadaad, jirdil, xabsi iyo dilba. Waa in la qadariya difacayaasha xuquuqal insaanka lana badbaadiyaa madaama ay wax tar wayn u leeyahiin ummadda waana inay kaalin muhim ah ka cayaraan qorsha hawleedka ummadda.

“Maadaama aan fooda la galayno sannadka 2011, si wadajir ah aan u wada shaqayno si aan uga guulaysano caqabadaha hor taagan soo celinta nabadda iyo xasilloonida. Tallaabo kasta oo aan qaadayno waa in ay ku qotontaa mabaadi'da waaweyn ee bani aadanimada oo ku cad Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqal Insaanka.”

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org